



Bildungs- und Kulturdirektion
Direction de l'instruction publique et de la culture

Sulgeneckstrasse 70
3005 Bern
+41 31 633 85 11
gs.bkd@be.ch
www.bkd.be.ch

Bildungs- und Kulturdirektion, Sulgeneckstrasse 70, 3005 Bern

Ku socoto waaladiinta iyo masuulada
ardayda dugsiyada ku yaalo Canton Bern

2020.BKD.1588 / 307163

Bern, 30 Abriil 2020

Dugsiyada dib ayay u furayaan

Waaladiinta iyo masuulada qaaliga ah,
Ardayda qaaliga ah,

Dugsiyada waxay dib u furayaan albaabadda markale xiliga 11 Maajo 2020. Kani waa aqbaar wanaagsan!

Isbuucyadaan la soo dhaafay waxay gabi ahaanba aheyd waaya aragnimo cusub iyo caqabada weyn noo tahay dhammaanteen. Qof walba wuxuu sameeyay shaqo wanaagsan – macalimiinta, madaxyaada dugsiyada, shaqaalaha barnaamijyada daryeelka carruurta iyo, dabcan, adiga iyo qoy-saskaaga. Waxaan jeclaan lahaa inaan qof walba uga mahadceliyo midaan.

Waxaan rabnaa inaan qaadno qaab taxadar ah oo dib loogu bilaabayo casharada. Labada maalin ee ugu horeyso, waxbarasho ayaa lagu meeleynayaa kooxyo fasal barkiisa ah; madaxa dugsiyada ayaa kuu soo dirayo warbixinta muhiimka ah. Wajiga koowaad, shaqaalaha waxbarida ayaa ka hadlayo oo ku dhaqmayo tallaabooyinka illaalada caafimaad iyo ardayda. Tallaabooyinka waa la hubaa inay sii wadeyso qaabeynta nolol maalmeedka ee dugsiyada oo muddo dheer oo imaaneyso. Marwalbo suurtoagal ah, tilmaanta fasalka oo dhan ah wuxuu bilaabanayaa 13 Maajo 2020.

Waxaan weydiineynaa shaqaalaha waxbarida inay taxadar gaar ah siiyaan aqoonsashada boosas walboo banaan ama hoos u dhaca hormarka waxbarashada ee carruurta ku jirto fasalkooda. Qof walba waa in loo ogolaadaa waqti ku fillan oo dib loogu dajinayo jadwalka maalinta-dugsiga. Ma ahan in qof walba u shaqeynayo si habsami leh ka soo bilow bilowga. Laakin waan ognahay inaan xisaabin karno madaxyaada dugsiyada iyo macalimiinta, sidoo kale sida huritaankaaga iyo wada shaqeynta wanaagsan ee dhinacyada oo dhan.

Ma jiraan carruur ama qaangaar oo lagu meeleynayo xaalad aan wanaagsaneyn oo masiibadaan ah: tani waa barta walaaca ugu weyn ii tahay aniga. Sida quseyso wargelinada qiimeynta ka hor fashaxyada kuleelaha, tani waxaa laga wadaa in qiimeyntaas xisaabiso dhinacyada wargelinta dhammaadka-sannadka waa in lagu hayaa xukunka ugu yar oo cabiran ee la isticmaalayo. Sida mabda'da guud, dhammaan waxqabadyada ka hor 16 Maarso 2020 waa la tixgelinayaa, iyo inta u dhaxeysa 11 Maajo 2020 iyo dhammaadka sannad dugsiyeedka, kaliya kartiyada ardayda ay yeesheen fursad ku fillan oo lagu hormarinayo si dheeraad ah iyo tababarka waa la imtixaamayaa. Intaas waxaa dheer, kaliya shaqada sababeyso sare u qaadida qiimeynta guud ee ardayda waxay xisaabineysaa dhinaca qiimeyntaas.

Qiimeynadaan, macalimiinta waxay bixinayaan culeys badan oo waxbarashada hormarada iyo hormarka ay carruurta iyo dhalinyarada sameeyeen ee la xiriirto sannad dugsiyeedka xiggo. Kani waa aaga halka shaqada adag iyo madaxbanaanida carruurta iyo qaangaarada la qiran karo. Halka ay jiraan su'aalaha qaar sida aastaanta ku haboon ama la xiriirto dabagalka waxbarashada ardayda, go'aamada waa in marwalba ay taageertaa ardayda.

Miyay gabadhaada ama wiilkeyga dhameystirayaa dugsigu kuleelahaan? Haddii iyada ama isaga uusan weli heli barashada xirfada, waan ku faraxsannahay inay iisuurtogasho inaan ku soo ogeysiiyo dhammaadka waqtiga oo gabagabada heshiisyada waxaa lagu kordhiyay Sebteembar 2020. Marka, haka niyad jabin! Sii wad caawinta gabadhaada ama wiilkaaga raadintooda xirfada waxbarashada. Macalimiinta, jaheynta shaqada iyo xarumaha warbixinta (BIZ) iyo kormeeraha dugsigu (Schulinspektorat) wuu ku farxayaa inuu kugu caawiyo midaan sidoo kale.

Ka bilow hoosta qalbigeyga, waan kaaga mahadcelinayaa dhammaan, waaladiinta qaaliga ah iyo masuulada iyo ardayda qaaliga ah, oo wax walba oo aad ku sameysay isbuucyadaan adag ee la soo dhaafay. Illaa iyo hadda, waxaan la wada kulanay saameynta masiibadaan: ardayda, qoysaskooda iyo dugsiyada. Inaga, sida bulsho. Rabitaankeyga adiga kugu aadan, iyo rajadeyda oo dhammaan sababaheena, waa in nolol maalmeedkeena ay dhawaan ku soo laabaneyso si caadi ah.

Waxaan kuu rajeynayaa adiga iyo qoyskaaga dhammaan tan ugu wanaagsan,
Daacadnimo,

**Die Bildungs- und Kulturdirektorin
Agaasimaha waxbarashada iyo arrimaha
dhaqanka**



Christine Häslér
Regierungsrätin
Xubinta Gollaha Fullinta